



Khashkhashaada Galmada Mulkiilaha Gurigu uu Rabo

Sexual Harassment in Housing

Waa maxay waxa la yiraad khashkhashaadaha galmada Mulkiilaha uu rabo?

Khashkhashaadaha galmada mulkiilaha gurigu waa marka cid guri leh, ama shaqaalahoodu:

- sameeyaan falal shukaansi la xiriira oon lala wadin,
- dalbadaan in lala galmoodo, ama axsaan galmo loo sameeyo,
- ayna marmar badan isticmaalaan erayo ama falal ku saabsan galmada,
- kufsiyada, ama ay adiga ku xoogaan

WAA SHARCI-DARRO

Guri caynkee ah ayuu sharcigu quseeyaa?

Sharcigu waxa uu quseyn karaa nooyco badan oo guryo ah oo ay ku jiraan guryaha gaarka loo leeyahay, saraha dhaadheer, guryaha la wada leeyahay, guryaha dowlada, gabaadka dadka hoy la'aanta ah.



Waa maxay qaarka ka mid ah tusaalooyin ka mid ah khashkhashaada galmada ee Mulkiilaha gurigu uu rabo?

Kolka khashkhashaadahu

- Uu kaa codsado shukaansi
- Uu kaa codsato inaad uga bedelato la galmoood ama axsaan dhanka galmada kirada
- Uu kuugu hanjabo inuu guriga kaa saaro waayo waxaad diiday inaad la galmooto isaga/iyada
- Guriga uusan kaa hagaajin waayo waxa aad diiday inaad la galmooto ama waxa aad ku tiri isaga/iyada jooji.
- Wuxuu kugu yiri adiga hadal ku dareensiya hanjabaad ama jeclaysi la'aan
- Kuu taabta adiga qaab aadan doonayn oo la xiriira galmada
- Ku kufsada ama ku xooga adiga

Ma quseeyso hadii aad ka qaybqaadatid ama aad diido. Xataa hadii aad iska ogolaatay mar hore inaad galmada lagaa dalbaday aad sameyso, **waxaad xaq u leedahay inaad joojiso hadda.**

Maxaan sameyn karaa?

Waxa wax ugu muhiimsani waa amaanka - Waco caawimaad! **Haddii lagu xoogo, wac 911.**

- Hadii aadan rabin inaad bilayska u sheegto laakiin Aad rabto inaad cid kale la hadasho, wac (Day One Crisis Line) ee (866) 223-1111, dhamaal (text) u dir (612) 399-9995, ama email safety@dayoneservices.org.
- Waxa aad u dacwoon kartaa Wasaarada Guryaha iyo Horumarinta Beledyada ee U.S. [U.S. Department of Housing and Urban Development (HUD)], Waaxda Xaquuqda Aadanaha ee Minnesota (Minnesota Department of Human Rights) ama hay'ada magaalo. Wac iyaga si aad uga hesho akhbaar ku saabsan waxa la sameeyo. Waxa ay ku baari asktakadaada lacag la'aan. Kiisaska intooda badan waxa aad u baahan tahay inaad ku xareysato dacwda ama qaansheegadka 1 sanno ama marmarka qaarkood 2 sanno gudahood.

MN Department of Human Rights (*Waaxda Xaquuqda Aadanaha*)

Griggs Midway Building
540 Fairview Ave. N, Suite 201
St. Paul, MN 55104

Telefan: (651) 539-1100 or (800) 657-3704

MN Relay: 711 or (800) 627-3529

Online ee <https://mn.gov/mdhr/intake/consultationinquiryform/>

Khadka ka gargaarka takoorka (helpline): (651) 539-1100 ama (833) 454-0148

Imaylka ah: info.mdhr@state.mn.us shabakada (website) ah: www.mn.gov/mdhr/

Housing and Urban Development (HUD)

(*Wasaarada Guryaha iyo Horumarinta Beledyada ee U.S. (HUD)*)

Minneapolis Field Office
212 Third Ave South, Suite 150
Minneapolis MN 55401

Telefan: (612) 370-3000

Housing and Urban Development (HUD)

Great Lakes Regional Office
77 West Jackson Boulevard
Chicago, IL 60604

Telefan: (312) 353-6236

Labada xafiisba: www.hud.gov



- Wac qareen si aad ugala hadasho waxyabaha aad kala dooran karto. Qareenku:
 - Waxa uu kuu soo heli karaa amar maxkamadeed si oo kaa dheereeya khashkhashaadaha adiga
 - Waxa uu ka dagaalami karaa dacwada guri ka saarida ah ee ay qolada gurigu ay xareysatay sababtoo ah jawaabta aad ka bixisay khashkhashaadha galmaada
 - Waxa uu bilaabi karaa kiis xaquuqda muwaadinka ah (civil rights) waxa uuna ka codsan karaa maxkamada in qolada gurigu ay lacag magdhow ah ku siiso.

Ogow xaquuqdaada

- Waa sharci-darro in qofka aad uga jirto ama shaqaalaha guryahu ay kugu khasbaan inaad la galmooto isaga/iyada oo kuugu hanjabaya inuu guriga kaa saari hadii kale.
- Waa sharci-darro in qofka aad uga jirto uu hadal galmaada la xiriira oo aadan doonayn kugu yiraa kaa oo ku dariinsiiya caga-juglany.
- Hadii ay ku khashkhashaad dhanka galmaada ah ay kugu hayso qolada guriga aad uga jirtaa, u sheeg isaga/iyagu joojiyo.
- Qor waxa kugu dhaca inta ay wali ku cusub tahay xasuustaada. Waa muhiim inaad haysato wax qoran.
- Waa sharci-darro in qolada guriga lehi kaaga saarto guriga sababtoo ah waxa aad wacatay bilayska si ay kuu caawiyaan.

Waxa aad xaq u leedahay in khashkhashaadha galmaada ah aan lagugu sameyn

Si aad arrintan wax uga ogaato

Ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga (877) 696-6529.

Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta:
www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Gal www.LawHelpMN.org/so si aad uga hesho macluumaa kale oo ku saabsan xaquuqada xaqqa guryaha iyo khayraadyo.



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuql kasta oo la sii daabaco. Dib u daabiciddu, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsii ah waa mid si adag loo mamnuucay.